


# ICRC-da OO SHAQEYNEYSA

SI KOOBAN

ICRC




## CIDDA AAN NAHAY:

Muddo 150-sano ka badan ayaa Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) wuxuu kaalmaynayey dadka dunida ku dhaqan ee colaadda hubaysan iyo gacan-ka-hadalka kaleba ay saameyeen. Annaga oo ah urur bini'aadamnimo oo madax bannaan, waxaan samaynaa wax kasta oo aan kari karno si aan u dhawrno dadka sharaftooda, isla markaasna dhibaatada haysata aan u yarayno, annaga oo inta badan la shaqaynayna hey'adaha aan iskaashiga la leenahay sida Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas.

Waxaannu isku hawlnaa ka hortagga darxumada, annaga oo u marayna baahinta iyo xoojinta xeerka caalamiga ah ee bini'aadamnimada (xeerka colaadda hubaysan), iyo u qareemidda mabaadi'da caalamiga ah ee bini'aadamnimada. Maadaama aan nahay cidda mas'uulka ka ah xeerarkaan, waxaan nahay awoodda dhaqaajinaysa Heshiisyadii Jineefa ee 1949kii.


Ismail Taxta/ICRC

## WAXA AAN QABANNO

- Waxaan ku dadaalnaa in aan hubinno in aan la dhibaateyn dadka rayidka ah iyo kuwa aan colaadaha qaybta ka ahayn
- Waxaan bixinnaa cuntada degdegga loogu baahan yahay, biyaha nadiifka ah, fayo-dhawrka iyo hoyga
- Waxaan booqannaa maxaabbiista dagaalka iyo kuwa nabadgelyada awgeed u xiran, si aan u hubinno inay haystaan xaalado nololeed oo la aqabali karo, isla markaasna si sharaf leh loola dhaqmo
- Waxaan dib-u-xiriirinnaa xubnaha qoysaska ku kala lumay colaadda hubaysan, ama qaxootiga
- Waxaan bixinnaa ama fududaynaa sidii dadka u baahani ay ku heli lahaayeen adeegyada asaasiga ah ee daryeelka caafimaadka
- Waxaan bulshooyinka ka caawinaa sidii ay u soo kaban lahaayeen, innaga oo siina waxyaabihii ay noloshooda dib ugu dhisi lahaayeen
- Waxaan dhinacyada ay colaaddu u dhexayso dhammaantood ku war-gelinnaa waajibaadka ka saaran xeerka caalamiga ah ee bini'aadamnimada
- Waxaan la soconaa sida loogu dhaqmo xeerka caalamiga ah ee bini'aadamnimo, isla markaasna horumarintiisa ayaan gacan ka geysannaa.
- Waxaan yaraynaa halista ka imaan karta miinooyinka dhulka lagu aasay ee aan weli laga saarin iyo walxaha aan wali qarxin


Abdikarim Mohamed/ICRC

- Waxaan caawinnaa Jamciyad Qarameedyada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, si colaadda hubaysan iyo gacan-ka-hadalka kaleba ay ugu diyaar-garoobaan, ugana jawaabaanan.

## MEELAHA AAN KA SHAQAYNO

Waxay shaqaalaheenu ka hawl-galaan 80 dal. Waxaa suuragal ah in ay joogaan goobta shaqada, iyaga oo gargaar degdeg ah u fidinaya dadka u baahan, in ay ka shaqaynayaan gobollada meelo ka mid ah, ayna ka hayaan hawlaha isku-dubbe-ridka iyo qaybinta gargaarka ama in ay ku sugan yihiin magaalooyinka waaweyn, halkaas oo ay ka fulinayaan hawlo bini'aadamnimo oo diblomaasiyeed.

Inta badan xubnaha shaqaalaheena oo 16,000 gaarayaa waxay joogaan goobta shaqada. Waxaa kaloo shaqaale noo joogaa xarunteena dhexe magaalada Jineefa  ee dalka Iswiiska, kuwaa oo na siiya taageero wax-ku-ool ah, howlaheenana kormeera.




## SIDA AAN U SHAQAYNO

Afar mabda' oo waaweyn ayaannu ku fulinnaa xilkeena bini'aadamnimo: bini'aadamnimo, eex la'aan, madaxbannaani iyo dhexdhexaadnimo. Waxaan caawinaa dadka dhibaateysan innaga oo ku saleyneyna sida ay u kala daran yihiin oo kaliya, sidaas daraaddeed ma danayno isirkooda, jinsigooda, siyaasadda amaba diintooda. Maadaama aan nahay hay'ad madaxbanaan oo dhexdheaad ah, waxaan tagi karnaa meelo hay'ado badan aysan tagi karin – innaga oo badbaadineyna nafta bini'aadamka aagagga dagaalka aan la gaari karin ee halista badan.






1863kii ayaa ICRCda la asaasay, waana xubnaha abaabulay Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Waxaan si dhow ula hawl-galnaa ururrada ay wada-shaqayntu naga dhexayso ee Dhaqdhaqaaqa nagula jira sida Xiriirka Caalamiga ee Ururrada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas iyo, sidoo kale, Jamciyad Qarameedyada Laanqayrta cas iyo Bisha Cas kuwaas oo 190 dal oo dunida ku kala baahsan oo hawlo Bini'aadamnimo ka fuliya.

Booqo bartayada internetka: **www.icrc.org**.

La xiriir ergada ICRCda ee kuugu dhow ama Laanqayrta Cas ama Bisha Cas laamahooda maxalliga ah ee kuu dhow.

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_somalia
blogs.icrc.org/Somalia

**Ergada ICRC Soomaalia**
Ngecha Road
off Lower Kabete Road
P.O.Box 73226-00200
Nayroobi, Kenya
T + 254 0709 132 000
SOK-Nairobi@icrc.org
© ICRC, June 2017

ICRC

Bogga hore: Abdirahman Abdullahi/ICRC
0728 402 10 2024 2000